



akhlaaqda Nabigu scw wuxuu ahaa Qur'aanka

Wuxuu yiri sacad Binu Hishaam Binu Caamir-markuu u galay Caa'isha-Allaha ka raali ahaadee-: Hooyadii mu'uminiintaay, ii sheeg akhlaaqdii Nabiga scw, waxay tiri: Qur'aanka miyaadan akhrin? waxaan iri: haa, waxay tiri: akhlaaqda Nabigu scw wuxuu ahaa Qur'aanka.

[Xadiis Saxiix ah] [muslim baa wariyey isagoo xadiis aad udheer ah]

Waxaa la waydiiyey Caa'isha-Allaha ka raali ahaade akhlaaqdii Nabiga scw waxay ku jawaabtay hadal aad u guda wayn, waxayna ku jeedisay qofkii su'aasha waydiiyey Qur'aanka oo ah kitaabka sifooyinkiisa oo dhan kaamil yihiin, waxayna dhahday: wuxuu ahaa Nabigu scw mid ka akhlaaq dhigta Qur'aanka, oo ku dhaqma isaga, Qur'aanku wuxuu faro wuu fulin jiray, wuxuu ka reebana wuu ka fogaanayey, khuluqiisu wuxuu ahaa mid Qur'aanka ku camal fala, kuna ekaada xuduuddiisa, ka edeb qaata quraanka, oo ku cibro qaata maahmaahyihiisa iyo qisooyinkiisa.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/8265>

